**IIB MA GALO**

# FAAFIN RASMIAH

# الجريدة الرسمية

**EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Sannadka 15aad Muqdisho 25 Abriile 1987 L 1 R 4

**Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMUHU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

# KOBNIIN

## QAYBTA KOOWAAAD

### SHARCI

SHARCI Lr. 7 ee 24 Maarso 1987,
Dhismaha Hay'adda Samafalka Dhiigga ........ Bog. 243

SHARCI Lr. 8 ee 24 Maarso 1987,
Oggolaansho Heshiis amaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Iskaashiga Dhaqaalaha ................. 248

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lr. 9 ee 24 Maarso 1987,
Meel-marin Heshiis amaaheed ........................ 249

DECREE N. 9 on 24 March 1987,
Instrument of ratification ......................... 250

# QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.87,
Lumid Jeeg War. L. 392272 ku qoran Maxamuud Maxamed Xaaji Ibraahim Lr. 90 .......... 251

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.3.87,
Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Caasha Xaaji Axmed Lr. 91 .......... 252

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.3.87,
Lumid Jeeg War. L. 0378833 ku qoran Cabdulqaadir Xaaji Busuri Lr. 92 .......... 253

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.3.87,
Lumid Jeeg War. L. 0609405 ku qoran Maxamuud Xaaji Axmed Lr. 93 .......... 254

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 4.4.87,
Lumid Jeeg War. L. 0435399 ku qoran Ibraahim Cabdi Jaamac Lr. 94 .......... 255

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.4.87,
Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdi Jaamac Lr. 95 .......... 256

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.4.87,
Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cumar Iidle Suleymaan .......... 257

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 11.1.87,
Lumid Jeeg War ku qoran Shugri X. Ciise Cali .... 258

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.4.87,
Lumid Jeeg War. ku qoran Maxamed Aadan Takar . 259

MAXKAMADDA G. W. GALBEED, 6.1.87,
Lumid Jeeg War. ku qoran Ibraahim Nuur Xasan ... 260

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.4.87,
Lumid Jeeg War. ku qoran Faadumo Xaaji Cabdullaahi .......... 261

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.4.87,
Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xasan Cali .......... 262

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.4.87,
Lumid Jeeg War. ku qoran Sahra Xasan Bulaale Xirsi 263

**QAYBTA KOWAAD**

**S H A R C I**

Sharci lambar 7, taariikh 24 Maarso 1987
Dhismaha Hay'adda Samafalka Dhiigga.

# MADAXWEYNAHA JDS

**ISAGOO TIXGELINAYA** Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad
*(Dhismaha Hay'adda)*

1. Waxaa la dhisay Hay'adda Samafalka Dhiigga ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed Heer Qaran oo hadda kaddib lagu tilmaami doono "HAY'ADDA".

2. Hay'addu waxay leedahay shakhsiyaad qaanuuni ah, waxayna u madaxbannaan tahay maamulkeeda.

3. Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay Hay'adda ku leedahay kormeer.

Qod. 2aad
*(Ujeeddooyinka Hay'adda)*

Ujeeddooyinka Hay'addu waa:

1. Inay diyaariso kayd dhiig iyo curiyayaashiisa kala duwan oo loogu tala gelayo marka dhibaato degdeg ahi Qaranka soo food-saarto.

2. Inay ka qayb qaadato hawlaha la xiriira sare-u-qaadidda wacyiga dhiig-bixinta ee Ummadda Soomaaliyeed, si loo helo tabarucayaal dhiig.

3. Inay diyaariso baarista, tijaabinta iyo u-kala-bixinta curiyayaasha kala duwan oo ay hadba u baahdaan iyadoo la raacayo talada Wasaaradda Caafimaadka.

5. Inay sare-u-qaaddo cilmi-baarista dhiigga iyo in ay xiriir cilmi-baarisa la yeelato Hay'adaha ka jira dalka gudihiisa iyo dibad-diisaba ee arrintaas wax kala qaban kara.

6. Inay tababarro la xiriira farsamada ku-daaweynta dhiigga iyo wixii kale ee cilmi ah arrintaas ku saabsan u diyaariso takhaat-iir, arday jaamacadeed iyo shaqaale caafimaad.

Qod. 3aad
*(Awoodda Hay'adda)*

Hay'addu, si ay ujeeddooyinkeeda ku gaarto, waxay leedahay awood kasta ee ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku qoran Qod. 2aad ee Sharcigan, gaar ahaan waxay xiriir hawleed la yeelan kartaa Hay'adaha Qaranka iyo kuwo gaar ahba.

Qod. 4aad
*(Xarunta Hay'adda)*

Xarunta Hay'addu waxay noqonaysaa magaalada Muqdisho, waxayna haddii loo baahdo, laamo ku yeelanaysaa Gobollada iyo Degmooyinka dalka.

Qod. 5aad
*(Xubnaha Hay'adda)*

Xubnaha Hay'addu waxay ka kooban yihiin:

1. Guddiga Sare;
2. Guddiga Fulinta;
3. Maamulka.

Qod. 6aad
*(Guddiga Sare)*

b) Guddiga Sare ee Hay'addu wuxuu ka kooban yahay:

1. Madaxweynaha JDS Madax sharaf;

2. Qof uu magacaabo Madaxweynaha JDS oo noqonaya Guddoomiye;

3. Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS ama qof wakiil ah.

4. Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka ama qof ka wakiil ah;

5. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ama qof ka wakiil ah;

6. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ama qof ka wakiil ah;

7. Guddoomiyaha Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ama qof ka wakiil ah;

8. Shan (5) Xubnood oo ah dad in muddo ah qayb ballaaran ka qaadanayey hawlaha samafalka iyo horumarinteeda oo uu magacaabo Guddoomiyaha Guddiga Sare;

9. Guddoomiyayaasha Ururrada Bulshada ama Wakiilladooda;

10. Maamulka Hay'adda - Xoghaye.

t) Xilka Guddiga Sare ee Hay'addu waa sida soo socota:

1. Dejinta siyaasadda guud ee Hay'adda;

2. Oggolaanshaha qorshaha ee Hay'adda ee uu soo diyaariyo Guddiga Fulintu, soona hordhigo Maamulka Hay'adda;

3. Kaalmo u doonidda Hay'adda.

4. Oggolaanshaha Miisaaniyadda iyo Xisaab-xirka.

5. Tallaabo ka qaadidda waxyaabaha kale ee la soo gudboonaada danta guud ee Ha'yadduna ku jirto;

6. Guddigu wuxuu shir caadi ah isugu imaanayaa laba jeer sannadkii, haddiise loo baahdo wuxuu isugu imaan karaa fadhi aan caadi ahayn.

Qod. 7aad

*(Guddiga Fulinta)*

b) Guddiga Fulintu wuxuu ka kooban yahay:

1. Maamulka Hay'adda;
2. Agaasimayaasha Waaxyaha iyo;
3. Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha ee Hay'adda.

t) Xilka Guddiga Fulintu waa sida soo socota:

1. Fulinta ujeeddooyinka ku qoran Qod. 2aad ee Sharcigan iyo go'aanka Guddiga Sare (National Board and Blood Transfusion Service).

2. Dejinta Qorsho-sannadeedka ee Hay'adda.

3. Daba-galka hirgelinta qorshaha.

4. Diyaarinta Miisaaniyadda iyo Xisaab-xirka la hor-dhigo Guddiga Sare.

Qod. 8aad
*(Maamulaha Hay'adda)*

1. Maamulaha Hay'adda waxaa noqonaya takhtar aqoon gaar ah (Takhasus) u leh cudurradda dhiigga oo lagu magacaabayo Xeer Madaxweyne;

2. Maamulaha Hay'adda darajadiisu waxay u dhigantaa mid Agaasime Guud;

3. Maamulaha Hay'adda wuxuu noqonayaa Guddoomiyaha Guddiga Fulinta;

4. Xilka Maamulaha Hay'adda waa sida soo socota:

   b) Wuxuu fuliyaa ujeeddooyinka Hay'adda, go'aannada Guddiga Sare iyo kan Fulinta;

   t) Wuxuu si gaar ah mas'uul uga yahay fulinta hawl-maalmeedka caadiga ah, anshaxa shaqaalaha iyo hawl-gelintooda iyo la xisaabtanka Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Madaxda kale ee Hay'adda;

   j) Wuxuu saxiixaa heshiisyada Hay'addu dhinac ka tahay;

   x) Wuxuu mas'uul ka yahay hawlaha farsamo ee la xiriira dhiigga.

Qod. 9aad
*(Hantida Hay'adda)*

Hantida Hay'adda, waxay ka kooban tahay:

1. Wixii deeq ay ka hesho Dawladda Soomaaliyeed iyo Hay'adaheeda;

2. Wixii ay deeq ahaan uga hesho Dawlado Shisheeye, Ururro Caalami ah, Hay'ado Samafal iyo dad kale;

3. Lacagta kaydka ah ee sannad walba dhiganta;

4. Lacagta ka soo gasha hawlaha ay qabato ama hanti ay wareejisay.

Qod. 10aad

*(Maamulka Lacagta)*

Habka Maamulka Lacagta, Miisaaniyadaha iyo xisaab-xiridda Hay'adda waxaa la raacayaa habka u qoran Ururrada Bisha Cas.

Qod. 11aad

*(Shaqaalaha)*

Shaqaalaha Hay'adda waxaa lagu dhaqayaa Xeerka lagu dhaqo Shaqaalaha Ururka Bisha Cas.

Qod. 12aad

*(Xiriirka Dibedda)*

Hay'addu waxay xiriirro saaxiibtinnimo, aqoon-isweydaarsi, waayo'aragnimo is-dhaafsi iyo iskaashi la yeelan kartaa Hay'ado Shisheeye iyo kuwo Caalami ah, si ay sare ugu qaaddo kartideeda dhaqaale, cilmi iyo farsamo.

Qod. 13aad

*(Xeer-Hoosaad)*

Wasiirka Wasaaradda Caafimaadku, isagoo tixgelinaya talo soo jeedinta Guddiga Sare, wuxuu soo saarayaa Xeer-Hoosaad lagu faahfaahinaayo Sharcigan.

Qod. 14aad

*(Burrin)*

Waxaa la burriyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 15aad

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

*Muqdisho, 24 Maarso 1987*

*Madaxweynaha JDS*

*(Maxamed Siyaad Barre)*

Sharci lambar 8, taariikh 24 Maarso 1987
Oggolaansho Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Iskaashiga Dhaqaalaha ee Jabbaan oo loogu talo galay Barnaamijka Qalabka Beeraha.

# MADAXWEYNAHA JDS

**ISAGOO TIXGELINAYA:** Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga:

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Iskaashiga Dhaqaalaha Dibedda ee Jabbaan oo ku saabsan Amaah Lacageed oo dhan (YEEN) 1.200.000.000/ (hal bilyan iyo laba boqol oo malyuun) oo loogu talo galay "Barnaamijka Qalabka Beeraha".

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho (Soomaaliya), taariikhdu markay ahayd 6da Janaayo 1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqan-gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS, waxaa awood loo siiyey in uu meel-mariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafita Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

*Muqdisho, 24 Maarso 1987*

*Madaxweynaha JDS*
*(Maxamed Siyaad Barre)*

## QAYBTA LABAAD

## XEER

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lr. 9, ee 24 Maarso 1987
Meel-marin Heshiis Amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Iskaashiga Dhaqaalaha Dibedda ee Jabbaan oo loogu talo galay "Barnaamijka Qalabka Beeraha".

# MADAXWEYNAHA JDS

**MARKUU ARKAY:** Qod. 67, farqadda 5 iyo Qod. 82, farqadda 4 ee Dastuurka;

**MARKUU ARKAY:** Sharciga lambar 49 ee 23ka Dishembar 1984; kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

**MARKUU ARKAY:** Sharciga lambar ..... ee 24/3/1987 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday (Guddiga Joogtada ah) meel-marinta heshiiskan;

**MARKUU ARKAY:** In ay lagama maarmaan tahay in la meel-mariyo Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyey Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Iskaashiga Dhaqaalaha Dibedda ee Jabbaan oo lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho, taariikhdu markay ahayd 6da Jannaayo 1987, looguna talo galay Barnaamijka Qalabka Beeraha.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa dalka JDS awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta rasmiga ah Jamhuuriyadda.

*Muqdisho, 24/3/1987*

*Madaxweynaha JDS*
*(Maxamed Siyaad Barre)*

Decree N 9, of 24/3/1987
Instrument of Ratification.

**THE PRESIDENT**

| | |
|---|---|
| **HAVING SEEN** | The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic; |
| **HAVING SEEN** | The Law No. 49 of 23 Dicember 1984; |
| **HAVING SEEN** | The Law No. ..... of 24/3/1987 on the based of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree; |
| **HAVING CONSIDERED** | The necessity to ratify this Agreement. |

**HEREBY PROMULGATES**

The following Decree:

Article 1

The Loan Agreement for Agricultural Inputs Program (Stage I) between the Overseas Economic Cooperation Fund, Japan and the Government of the Somali Democratic Republic, signed in Mogadishu on January 6, 1987, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the Presiden of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

*Mogadishu, 24/3/1987*

*The President of SDF*
*(Mohamed Siad Barre)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamuud Maxamed Xaaji Ibraahim.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 392272, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 24.842, kuna qoran magaca J/L Maxamuud Maxamed X. Ibraahim sida ku cad war. lr. 8019 ee tr. 29/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 392272 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Garbahaarey kuna jirto lacag dhan Sh.So. 24.842, kuna qoran magaca Maxamuud Maxamed Xaaji Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Garbahaarey in ay siiso J/le Maxamuud Maxamed Xaaji Ibraahim lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 24.842 oo beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 31.3.87

**Kaal. Maxkamadda**
**Cabdulqaadir Cali Xaaji**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Caasha Xaaji Axmed. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In ay lumeen 2 Jeeg/War. Lrs. 0135201, 0135202 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000, iyo 35.000 kuna qoran magaca J/le Caasha Cabdi Yuusuf sida ku cad war. lr. 4484 ee tr. 19/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lrs. 0135201 0135202 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 85.000, kuna qoran magaca Caasha Cabdi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Qardho in ay siiso J/le Caasha Xaaji Axmed lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 85.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 11/3/87

| | |
|---|---|
| **Kaal. Maxkamadda** | **Gudd. Maxkamadda G/Banaadir** |
| **Maymuun Max'uud Maxamed** | **Dr. Cabdi Salaad Shongole** |

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Cabdulqaadir Xaaji Busuri. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0378833, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Sahra Ibraahim Khawaaji sida ku cad war. Ir. 5093 ee tr. 24/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci Ir. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0375833 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Sahra Ibraahim Khawaaji.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Cabdulqaadir Xaaji Busuri lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 27/3/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Maxamuud Xaaji Axmed. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0609405, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Faadumo Ismaaciil Muuse sida ku cad war. lr. 7061 ee tr. 28/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0609404 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca Faadumo Ismaaciil Muuse.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Gargeysa 2aad in ay siiso J/le Maxamuud Xaaji Axmed lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 28/3/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Ibraahim Maxamuud Cismaan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0435399, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 33.300, kuna qoran magaca J/le Ibraahim Maxamuud Cismaan sida ku cad war. Ir. 203 ee tr. 2/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, laanta Kowaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Ir. 2 ee tr. 9/9/1962dii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0435399 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 33.300, kuna qoran magaca Ibraahim Maxamud Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Kowaad in ay siiso J/le Ibraahim Maxamuud Cismaan lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 33.300 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 4/4/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Maxamuud Cabdi Jaamac. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In ay lumeen 3 Jeeg/War. Lrs. 0779185, 735200 iyo 0342651 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, 20.000 iyo 50.000, kuna qoran magaca J/le Maxamed Cabdi Jaamac sida ku cad war. Ir. 9224 ee tr. 5/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci Ir. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegagga Lrs. 0779185, 735200 iyo 0342651 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, 20.000 iyo 50.000, kuna qoran magaca Maxamed Cabdi Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa 1aad in ay siiso J/le Maxamed Cabdi Jaamac lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 170.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 5/4/1987

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Cumar Iidle Sumeylaam |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In ay lumeen 2 Jeeg/War. Lrs. 0729348, 0428669 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 iyo 50.000 kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Sheekh sida ku cad war. lr. 087 ee tr. 4/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta W/Dhiigley. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lrs. 0729348, 0428669 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta W/Dhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 150.000, kuna qoran magaca Cabdiraxmaan Maxamed Sheekh.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta W/Dhiigley in ay siiso J/le Cumar Iidle Suleymaan lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 100.000 iyo 50.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 7.4.87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Maxamuud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer**

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee lam. yahay 0614426, ee tr. tahay 11/1/87. |
| HADDUU ARKAY: | Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga & Kaydka Laanta Burco ee tr. 18/1/87. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69, 65, DL. Lumid J/Wareega lam. yahay 0614426, ee tr. tahay 11/1/87 kuna qoran J/le Shugri X. Ciise Cali. |

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas lam. yahay 0614426 ee tr. ahayd 11/1/87, kuna qorad lacag dhan (100.000) boqol kun oo shilin, ee ku qoraa Shugri X. Ciise Cali, markay ka soo wareegto 20 maalmood.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Xuseen Maxamuud, oo uu ka lumay, markay dhammaato muddada kor ku xusan.

Burco, 4.4.87

**Kaal. Maxkamadda**
**X. X. Sugulle**

**Gudd. Maxkamadda G/Togdheer**
**Dr. Abokor Islaw Cumar**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Aadan Takar. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0435816, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 48.000, kuna qoran magaca J/le Maxamed Aadan Takar sida ku cad war. lr. 9444 ee tr. 11/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0435816 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta kowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 48.000, kuna qoran magaca Maxamed Aadan Takar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta kowaad in ay siiso J/le Maxamed Aadan Takar lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 48.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 11/4/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

**MAXKAMADDA G. W/GALBEED (Hargeysa)**

**Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed (Hargeysa)**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Muxumed Garaaraale Sugule oo ku taariikheysan 22/12/86 kuna codsanayo in loo cusbooneysiiyo J.War. ee lumay ee hoos ku xusan Ir. 0610231, ku jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran J/le Ibraahim Nuur Xasan. |
| MARKUU ARKAY: | Taarka Bankigu laamihiisa u kala diray iyo xisaabaha guud ee 9/11/86. |
| MARKU ARKAY: | Xaashida lambarkeedu yahay 0005 ee ku taariikheysan 27/12/86 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga & Kaydka Soomaaliyeed lanta 1aad ee Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaasi Wareega ee lumay leeyahay astaamaha ujeeddada ku xusan, lagana sameeyey laanta kowaad. |
| MARKUU ARKAY: | In J/Wareega ee kor ku xusan uu iska leeyahay lacagtiisa ninka la dhaho Muxumed Garaaraale Sugule. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobbada 69-70 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxday 9/9/65. |

W U X U U

Go'aamiyey in la baabi'iyo J/War. ee lumay Ir. 0610231 loona cusbooneysiiyo Muxumed Garaaraale Sugule, cusboomeysiintaana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka heysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

M A X A A

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa waxaa la farayaa inuu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bankiga iridihiisa si ciddii haysata J/Wareega ee lumay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 6 - 1 1987

**Kaal. Maxk. GW Galbeed**
**(Axmed Wacays Maxamed)**

**Gud. Maxkamadda GWG (Hargeysa)**
**(Ibraahim Faarax Maxamed)**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Faadumo Xaaji Cabdullaahi. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0784744, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Cabdisalaam Maxamed Jibriil sida ku cad war. lr. 9577 ee tr. 14/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0784744 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta 2aad Hargeysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca Cabdisalaam Maxamed Jibriil.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta labaad Hargeysa in ay siiso J/le Faadumo Xaaji Cabdullaahi lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 14/4/87

| | |
|---|---|
| **Kaal. Maxkamadda** | **Gudd. Maxkamadda G/Banaadir** |
| **Maymuun Max'uud Maxamed** | **Dr. Cabdi Salaad Shongole** |

# MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdi Xasan Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg/War. Lrs. 0782752, 0447905 iyo 0447903, kuna jirto lacag dhan min Sh. So. 100.000, 50.000, 50.000 (200.000) kuna qoran magaca J/le Cabdi Xasan Cali sida ku cad war. Ir. 9822 ee tr. 19/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Ir. 2 ee tr. 9/9/1962dii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lrs 0782752, 0447905 iyo 0447903, laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, 50.000, 50.000 (200.000), kuna qoran magaca Cabdi Xasan Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta kowaad Hargeysa in ay siiso J/le Cabdi Xasan Cali lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 100.000, 50.000, 50.000 (200.000) oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 19/4/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Sahra Xasan Bulaale Xirsi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Kayd Lr. 5224, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 111.346.67 kuna qoran magaca J/le Sahra Xasan Bulaale Xirsi sida ku cad war. lr. 142 ee tr. 13/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, laanta Wadajir.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci lr. 2 ee tr. 9/9/1962dii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) B/Kayd Lr. 5224, laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 111.346.67, kuna qoran magaca Sahra Xasan Bulaale Xirsi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wadajir in ay siiso J/le Sahra Xasan Bulaale Xirsi lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 111.346.67 oo ah beddelkii B/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo [illegible]'inta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii [illegible]a horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 13/4/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'uud Maxamed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**